



CITY OF BOSTON • MASSACHUSETTS

OFFICE OF THE MAYOR
MARTIN J. WALSH

Bulshada Dugsiyada Dadweynaha Boston ee Qaaliga Ahow,

Waxaan dhawaan ku dhawaaqay maalgashi \$1 bilyan ah oo soconaya 10-sanno, kaas oo lagu sameynayo dhismayaasha iyo fasalada Dugsiyada Dadweynaha Boston. Dugsiyada Boston way gaboobeen. Macalimiinteena, maamulayaasheena iyo shaqalaheena ayaa si daal la'aan iyo xariifnimo ah uga shaqeeya si ay (dhismayaasha) ugu dhigaan jawiyo waxbarasho oo taageero leh. Laakiin xaqiiqdu waa, boqolkiiba 65 kamid ah 127 dugsi ee Boston waxa la dhisay kahor Dagaalkii Labaad ee Dunida, in ka yar kala badh oo kamid ah dugsiyaas ayaa si buuxda dib u habeyn loogu sameeyay, waanay ka muuqataa. Wakhtigaas, waxaan dhisnay waddo sare, waan duminay waxaan ku aasnay jid mara dhulka hoostiisa oo ku yaala bartamaha magaalada. Waa inaan awoodnaa inaan dhisno dugsiyo wanaagsan. Waa maalgashiyaga ugu fiican ee mustaqbalka.

Taasi waa sababta, muddo ka badan sannad aan u ururinaynay ra'yiga bulshada iyo xogta baahiyaha dhismayaasha dugsiyadeena - iyo sawirashada fursadaha suurogalka ah ee cusub ee mustaqbalkooda. Waxaan dhamaanteed kusoo ururinay **BuildBPS** oo ah qorshahayaga weyn ee waxbarashada iyo goobaha ee 10-sanno ee maanta si rasmi ah u bilowday. Si aad wax badan uga ogaato, fadlan booqo barta internetka ee cusub BuildBPS.org.

BuildBPS waxay waxka badali doontaa habka aan wax u qorsheyno, u dhisno iyo aan dib ugu habeyno dugsiyada. Iyo wax badan oo kale: waxay furi doontaa wax kasta oo kale oo aan u baahanay si aan ardaydeena ugu diyaarino guusha qarniga 21aad. Kaliya ma abuurayno dugsiyo casri ah, laakiin waxaan abuuraynaa goobo isbadali karo kuwaas oo degamadeena u ogalaan doona inay gaadhaan waxyaabo ay gaadhi karaan oo cusub marka ay Magaalada iyo duniduba ay isbadelaan.

Wajiga xiga ee **BuildBPS** wuxuu u baahanyay ka qeybqaadasho joogto ah oo qoto dheer. Build BPS waa dhokumenti si joogto ah loo cusbooneysiyo. Waxaan ku dhisaynaa aqoonta, hal-abuurnimada iyo huritaanka bulshooyinka dugsiyadeena si aan dib u sawirano una cusbooneysiino kaabayaasha dugsiyada dadweynaha Boston. Si wadajir ah ayaan u qorsheyn doonaa una dhisi doonaa si aan dugsiyada Boston u gaadhsiino wakhti cusub oo sinaan iyo heer sare ah.

Daacadnimo,

Martin J. Walsh, Duqa Magaalada